



## HESHIISKA SHIRKA MADAXDA DOWLAD FEDERALKA & DOWLAD GOBOLEEDYAD IYO GOBOLKA BANADIR

Dhuusamareeb, Soomaaliya agoosto, 19, 2020

Wareegii sadexaad ee wadatashiga madaxda qaranka ee arrimaha Doorashooyinka 2020/21 ee horey loogu heshiiyey shirkii dhuusamareeb laba ayaa ka dhacay Magaalo Madaxda Dowlad Goboleedka Galmudug ee Dhuusamareeb mudadii u dhaxaysay 15-19-2020. Waxaase xusid mudan in la sheego in Dowlad Goboleedyada Puntland iyo jubbaland aysan shirka soo qayb galin taas oo madaxa shirku aad uga xunyahiin.

Shirkan wadatashi waxaa ka soo qayb galay Madaxweynaha Jamuuriyada Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Cabdullahi Maxamed Farmaajo oo shirka guddominayey iyo madaxweyneyaasha Dowlad Goboleedyada ay ka midka yihiin Madaxweynaha Galmudug Mudane Axmed Cabdi Kaariye-Qorqoor oo shirka marti galiyey, Madaxweynaha Hirshabelle Mudane:Maxamed Cabdi waare, Madaxweynaha Koonfur Galbeed, Mudane:Cabdicasis Xassan Maxamed Laftagareen iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Mudane: Cumar Maxamuud Maxamed, cumar finish.

Waxaa iyana shirka qayb ka ahaa guddiga farsamada oo kala mataleyey Dowlada Federalka, dowlad Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir. Sida ku cad Warmurtiyeedkii Dhuusamareeb, Guddiga farsamada waxaa loo idmadey in ay ka soo baaraandagaan qaababka doorasho ee ugu haboon ee suurtoagal ka dhigi kara in doorasho wakhtigeedi ku dhacda oo heshiis lagu wada yahay dalka ka qabsoonto 2020/21, kadibna taladooda u gudbiyaan madaxda qaranka si ay go'aanka ku haboon uga qaataan.

Iyagoo ka duulaya waajibaadkooda shaqo, Guddigu waxay 8 Agoosto 2020 bilaabeen qorshe hawleedkoodii ku aadanaa xal u helida arrimaha loo idmadey. Wada tashi baahsan oo ay layeesheen qaybaha kala duwan ee bulshada soomaaliyeed, xisbiyada siyaasadeed iyo beesha caalamka kadib, Guddigu waxay wada tashi iyo falaqayn dheer kadib madaxda qaranka u gudbiyeen sadex qaab doorasho oo ay kamid tahay **mid ku salaysan Ergo Deegan doorasho: (Electoral constituency caucuses)**.

Madaxda qaranka waxay si qodo dheer oo taxadar ku jiro wadatashi uga yeesheen qaababkii doorasho ee ay Guddigu u soo gudbiyeen waxayna ugu danbayn madaxda qaranka ee shirka ka soo qayb gashey isku raaceen:


1. In qaabka doorashada 2020/21 noqoto mid **Deegan Doorasho ah (Electoral constituency caucuses)**
2. In Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka-GMDQ oo kaashanaya Maamulada Dowlad Goboleedyada fududeeyan dhisida Guddi xulis oo loo dhanyahay oo ka kala imanaya odayaasha iyo bulshada rayidka ah ee ka soo jeeda beesha wadaagta kursiga.
3. In Ergada kursi kasta noqoto 301 oo ka imanaysa beesha kursiga wadaagta




4. In Dowlad Goboleed kasta laga asteeyo ugu yaraan afar (4) deegaan doorasha oo ay ka dhacdo doorashadu
5. In codbixiyeyaasha 3dii ilaa 5tii kursi ee hal goob doorasho wada yaala la isku dhafo kadibna si wadajir ah ugu codeeyaan dhamaan musharaxiinta xisbiyada ee ku tartamaya kuraastaas.
6. In doorashadu kawada dhacdo dalka oo dhan hal maalin oo isku mid ah.
7. Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyin Qaranku-GMDQ waxay kuraasta lagu asteeyey deegaan doorashooyin aan amni ahayn u wareejin karaan deegaan doorasho kale oo amni ah.
8. In kuraasta Soomaaliland lagu doorto qaab doorasho dadban.
9. In qorsheynta iyo fulinta doorashada looga danbeeyo Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ) iyagoo kaashanaya Maamulka dowlad goboleedyada iyo Bulshada rayidka ah.
10. In doorashada lagu galo hannaanka xisbiyada badan
11. In Baarlamaanka Dowlad Goboleedyadu doortaan Aqalka Sare.
12. In heshiiskan loo gudbiyo Golaha Shacabka si uu sharci u noqdo.
13. Si doorashada wakhtigeeda ugu dhacdo waxaa la go'aamiyey in GMDQ dardargaliso hirgelinta doorashada.
14. Madaxda shirka waxa ka go'an in ay sii wadaan dadaalka xal u helida tabashooyinka ku aadan arrimaha doorashooyinka 2020/21 ee ay qabaan labada dowlad goboleed ee shirka ka maqan, waxaana rajeyneynaa in ay nagula soo biiraan wixii hawl ah dhiman.
15. In la ilaaliyo 30%-ka saamiga Haweenka
16. Wuxuu shirku u mahad celin iyo boogaadin u jeedinaya Madaxweynaha iyo shacabka Galmudug soo dhaweynta iyo martigalinta shirka.
17. Sidoo kale shirku wuxuu u mahad celinayaa beesha caalamka oo mar walba dadka soomaaliyeed lagarab taageero dhan walba ah.

#### SAXIIXAYASHA HESHIISKA DHUUSAMAREEB


1. Madaxweynaha Jamuuhiriyada Federalka Soomaaliya  
Mudane: Maxamed Cabdulahahi Maxamed-Farmajo




2. Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug  
Mudane: Ahmed Abdi kaariye-Qorqor



3. Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed  
Mudane: Cabdicasiis Xasan Maxamed-Laftagaren



4. Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabelle  
Mudane: Maxamed Cabdi Waare



5. Guddoomiyaha Gobolka Banaadir, ahna Duqa Magaalada  
Mudane: Cumar Maxamuud Maxamed-Cumar finish

